

Dhegaysiga dadka reer Alberta: Miisaaniyadda 2023

Noofambar 07, 2022 [Weydiimaha saxaafadda](#)

Dowladda Alberta waxay doonaysaa in ay dhageysato dadka reer Alberta maadaama Miisaaniyaddii 2023 la diyaarinayo.

Alberta ayada oo ku hoggaaminaysa wadanka kobaca dhaqaalaha iyo miisaaniyadda 2023 waxay sii wadaysaa in ay gobolka gaarsiiso boos uu ku heli karo soojiidasho maalgashi, dhaqaale meelo kala duwan kasoo galaya iyo shaqo abuur. Miisaaniyadda 2023 waxay sii xoojinaysa ka go'naanshiyaha ay innaga go'antahay inaynu nolosha ka dhigno mid jaban, sarena u qaadno hannaanka daryeelka caafimaadka, shaqo u abuurno una garab istaagno dadka reer Alberta.

“Alberta waa meesha ugu wanaagsan ee lagu noolaan karo, laga shaqayn karo caruurna lagu korsan karo. Miisaaniyadda 2023 waxay muhiimadda koowaad siinaysaa dadka reer Alberta ayada oo ka taageeraysa bulsahdeenna, ganacsiyada iyo qoysaska maalgalino istiraatiijiyaysan si taasi innoogu horseeddo mustaqbal barwaaqo ah. Waxaan rajaynayaa in aan maqlo waxyaabaha aad muhiimadda siinayso iyo afkaartaada ku aaddan Miisaaniyadda 2023. Fadlan wakhti ku bixi si aad xog aruurinta u dhammaystirto ama aad uga qaybgasho hadba qaabka aad u awooddo.”

Travis Toews, Madaxweynaha Guddiga Khasnajiga iyo Wasiirka Maaliyadda

Dhegaysiga dadka reer Alberta ayada oo la adeegsanayo la tashiga bulshadu waa qayb muhiim ah oo kamid ah hanaanka lagu diyaariyo miisaaniyadda Alberta. Intaa waxaa dheer, dowladdu waxay sidoo kale macluumaad ka aruurin doontaa kooxo kala duwan kuwaas oo ay kujiraan hoggaamiyaasha bulshada iyo ganacsatada.

Dadka reer Alberta waxay aragtiyahooda iyo afkaartooda ku saabsan miisaaniyadda tan xigta nagula wadaagi karaan ayaka oo buuxinaya xog aruurin onleen ah kulana soo biirayaa khadka teleefoonka xarumaha kulamada magaalada Wasiirka Maaliyadda Travis Toews. Ganacsiyada, dowladaha hoose, ururada warshadaha, ururada bulshada iyo ururada kaleba waxay miisaaniyadda ay soo gudbinayaan noogu soo diri karaan barteenna onleenka ah ayaka oo mattalaya ka ah urukooda.

Xog aruurinta iyo soo gudbinta onleenka ahba waa ay furan yihiin wakhti xaadirkaan. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan qaabkan iyo qaababka kale ee aad uga qay gali karto, fadlan bookho alberta.ca/BudgetConsultation.

Xaqiiqooyinka kooban

- Warbixinta waxyaabaha cusub ee saddexda bilood ee ugu horreysa miisaaniyadda 2022-23 ee dhacaysa Agoosto 31:
 - Qiyaasta dakhliga 2022-23 waa \$75.9 bilyan halka qiyaasta kharashka baxayaana uu yahay \$62.7 bilyan.
 - Taasi waxay saadaalinaysaa qiyaas \$13.2 bilyan oo dheeraad ah 2022-23, tanoo sababteeda ugu weyni tahay dakhliga khayraadka aan la cusboonaysiin karin ee rikoorka jabiyay, iyo sidoo kale canshuurta dakhliga ganacsiyada oo intii la qiyaasayay ka badan.
 - Ayada oo la bixinayo dayn \$13.4 bilyan gaaraysa, daynta canshuur bixiyuhu taageero waxaa loo saadaalinayaa inay noqon doonto \$79.8 bilyan taariikhdu markay tahay Maarso 31, 2023.
 - Saamiga wadarta daynta marka loo barbardhigo waxsoosaarka gudaha (GDP) waxaa lagu qiyaasay 10.3 boqolkiiba dhammaadka sannad miisaaniyadeedka, taasoo waafaqsan hadafka ah in lagu ilaaliyo in ka yar 30 boqolkiiba, si loo xaqiijiyo in Alberta ay gaarto boos adag oo ay daynta iskaga bixin karto.
 - Dhaqaalaha Alberta (sida lagu cabiray waxsoosaarka gudaha ama GDP) waxaa la filayaa in uu koro 4.9 boqolkiiba sannadkaan.

Macluumaadka la xiriira

- [Talo bixinta Miisaaniyadda 2023](#)
- [Macluumaadkii ugu danbeeyay ee misaaniyadda saddexda bilood ee ugu horeysa 2022-23 iyo warbixinta dhaqaalaha](#)

Weydiimaha saxaafadeed

Charlotte Taillon

780-932-5381

Xoghayaha Warfaafinta, Guddiga Khasnajiga iyo Maaliyadda